**APPENDIX B**

Waalidka Gacalka ahow

DOORASHADA WAALID KA MID NOQDA GUDDIGA MAAMULKA
< >

Waxa aan warqadda kuugu soo qorayo waa ku ogeysiinta in ay banaaan tahay < > boos oo waalid (waalidiin) ka mid noqda Guddiga Maamulka dugsigayaga iyo kugu marti-qaadista isku soo sharxidda doorasho ama soo magacaabidda waalid kale oo sidaas yeela.

Guddiga Maamulka, iyo maamulaha dugsiga, ayey saaran tahay mas'uuliyada guud ee maamulka dugsiga. Guddiyada maamulka saddex door oo muhiim ah bay ciyaaraan:-

- Hubsiimada arragti, nidaam iyo jiha istaraatiijiyadeed oo cad;
- Maamulaha dugsiga oo lagula xisaabtamo wax-qabadka dugsiga iyo ardaydiisa; iyo
- Ka warheyta guud ee wax-qabadka maaliyadeed ee dugsiga iyo hubsiimada in lacagta si wacan loo kharashgareyo.

Guddiga Maamulka waxa uu baahan yahay in uu xilkiisa si xoogan isugu xil-saaro, oo uu xiiseynayo wax su'aalidda iyo wax kala dhig-dhiga iyo rabitaanka waxbarasho. Hase ahaatee, waxa aan si qaas ah u soo dhaweyneynaa waalidiinta xirfadaha soo socda leh:- < >.

Waalidiinta guddiga maamulkayaga ka tirsan waxa ay xilka xafiiska heynayaan < > sano. Caadi ahaan hey'adayadan maamulka waxa ay kullantaa < > jeer sanadkiiba waxa ayna leedahay gudiyo < > iyagana kulma < > teeramkii walba.

Haddii aad jeclaan laheyd in aad doorashada isku soo sharaxdo ama aad magacowdo qof kale, waa in aad soo buuxisaa foomka halkan ku lifaaqan oo aad dugsiga u soo celisaa adiga oo ilmahaaga u soo dhiibaya. Foomamka is-sharaaxda/magacaabista oo la soo buuxiyey waa in la soo celiyaa ugu dambeyn dhamaadka maalinta dugsiga la dhiganayo ee < > ah. Haddii ay dhacdo in dadka isa soo sharxaya/la soo magacaabayo ay ka bataan boosaska banaan, doorashaa la qaban doonaa oo waalidkiiba hal warqad oo cod-bixin ah baa loo soo diri doonaa iyada oo ilmahaaga laguugu soo dhiibayo.

Haddii aad jeclaan laheyd macluumaad dheeraad ah oo buuxinta shuruudaha looga mid noqdo guddiga maamulka dugsiga ama doorka xubinta guddigaas, fadlan ila soo xiriir.

Daacad kuu ahaade/ahaato

Maamulaha Dugsiga (Headteacher)

**APPENDIX C**

## DOORASHADA WAALID KA MID NOQDA GUDDIGA MAAMULKA

## HAB-NIDAAMEEDKA MAGACAABIDDA – QORAALO WAALIDIINTA LOOGU TALLOGALAY

### Shuruudaha lagu ahaan karo oo ay tahay in la buuxiyo

1. Waa in aad tahay waalidka arday diiwaangashan oo dugsigan dhigta

   Qeexitaanka waalid waxaa soo galayo qof kasta oo leh dhamaan xuquuqda, waajibaadka, awoodaha iyo mas'uuliyadaha iyo maamulista waalid ku leeyahay kana saaran ilmo sharcigana u ogol yahay, markaas waalid ma aha uun waalidiinta ilmahas dhalay ee waxaa ka mid ah ilmo uu dhalay laba is-qabta/qabtay ama isla degan/daganeyd midkood (step-parents), qaraabada ama waalidiinta ilma dhalay ama waalidiin ilmaha korinaya (foster parents).

2. Ma **BUUXINEYSID** shuruudaha lagu noqdo waalid guddiga maamulka ka mid ah haddii aad:

   - dugsiga ka shaqeyso wax 500 00 saac ka badan sanadkiiba;
   - tahay xibin la doortay oo ka tirsan Gollaha Magaalada Leicester
   - tahay mid ay Xeerarka/Qaanuunada degsan u diidayaan – soo koobidda shuruudada buuxintooda loo baahan yahay ah baa warqadan ku lifaaqan.

   Haddii aad ka shakisan tahay in aad shuruudaha lagu noqdo waalid ka mid ah guddiga maamulka iyo in kale, fadlan la xiriir Maamulaha Dugsiga.

3. Xil ka qabashada guddiga maamulka oo dhan waa wax ku xiran saxiixa bayaan ay xubinta ku qireyso buuxinta shuruudaha guddigaloo mid noqdo.

### Sida Doorashaha la isugu soo Sharxo

4. Haddii aad jeclaan laheyd in aad isdoorashada isu sharaxdo, fadlan buuxi foomka halkan ku lifaaqan oo weydiiso waalid kale oo ay dugsiga ilmo u dhigtaan in uu ku labeeyo oo ku soo magacaabaya. Qofkaas **ma ahaan karo** midka aad isqabtaan ama wada degan tihiin.

5. Talladu waa in ay musharaxiinta oo idil keenaan bayaan iyaga ku saabsan oo inta wax dooraneysa loo qeybiyo, haddii cod-bixin loo baahdo.

6. Foomamka is-sharaaxda/magacaabista oo la soo buuxiyey waa in dugsiga loo soo celiyaa ugu dambeyn dhamaadka maalinta dugsiga la dhiganayo ee < > ah. Foomka boostaha ayaad dugsiga ugu soo diri kartaa laakiin waa in ay taariikhdan maamulaha dugsiga ku soo gaartaa.

APPENDIX D

## SHURRUDAHA ADEEG BIXINTA IYADA OO GUDDI MAAMUL DUGSI LA YAHAY

Qof guddiga maamulka ka mid noqonaya waa in uu yahay 18 jir ama da' ka weyn yahay goorta la dooranayo ama la magacaabayo oo hal waqtina iskuma heyn karo wax hal xubin guddi maamul ah isla dugsigaas ah.

**Qofka waa ka mamnuuc in uu qabto ama sii ahaado xubin gudi dugsi maamulaha ama xubin xiriir la leh (associate) haddii uu qofkaas:**

- saaran yahay amar musalifaad ama kicin (bankruptcy) ah oo xadidaya, amar musalifaad ama kcin si ku meel gaar ah u saaraan yahay, amar amaah ka gargaaris xadidaya ama amar si ku meel gaar ah u xadidaya oo amah loogaga gargaarayo;
- hantidiisa amar lagula wareegey ama la wareegistaas aan weli la meelmarin, laga noqon ama wax laga dhimin;
- uu saaran yahay:
    - amar ka mamnuucaya ama amar wax ka mamnuucid loo cuskanayo Xeerka Agaasimeyaasha Shirkad ee 1986
    - amar ka mamnuucid ah oo cuskanayo Xeerka Wax Ka Mamnuucida Agaasimeyaasha Shirka (Waqooyiga Ireland) ee 2002
    - Ballanqaad wax ka mamnuucid la ogolaaday oo loo cuskanayo amar wax ka mamnuucida Agaasimeyaasha Shirkad (Waqooyiga Ireland) ee 2002
    - Amar la bixiyey iyada oo la cuskanayo qeybta 429(2)(b) ee Xeerka Musalif Amaah lagu leeyahay iska bixin Karin ee 1986 (ku bixin xitaa markii amar maamul ka soo baxey maxkamadda gobolka);
- amar Koomishinka ama Koomishanada Sadaqadaha ama Maxkamad Sare lagaga xayuubiyey boos sarkaal sadaqad (charity trustee) ama sadaqad uu sarkaal u ahaa (trustee for a Charity) iyada oo loo cuskanayo dhaqan xumo ama maamul xumo uu kula kacay sadaqada, ama amar loo cuskanayo qeybta 34 ee Xeerka Sadaqadaha iyo Maalgelinta Saraakiisha Sadaqadaha (Scotland) ee 2005 iyada oo loo cuskanayo welwel looga qabo inuu ku lug lahaado wax maamul ama xukumaad ahba;
- ku jiro liiska dad uu Xoghayaha Dowlada (Secretary of State) u heysto in ay yihiin kuwo aan ku habooneyn in ay carruurta la shaqeeyaan;
- laga mamnuucey in uu carruurta la shaqeeyo ama uu saran yahay amarka loo cuskanayo qeybta 142 ee Xeerka Waxbarashada ee 2002;
- laga mamnuucey in uu carruurta la shaqeeyo iyada oo cuskanayo qeybaha 28,29, ama 29A ee Xeerka Cadaalada iyo Denbiyada iyo Adeegyada Maxkamadda ee 2000;
- laga mamnuucey isku diiwaangelinta ilmo heynta ama bixinta adeega (ilmaha) maalinta lagu daryeelo iyada oo la cuskanayo Qeybta 2 ee Hal-beega Carruurta iyo Qoysaska (Wales) ee 2010;
- laga mamnuucey is diiwaangelintaiyada oo la cuskanayo Qeybta 3 ee Xeerka Daryeelka Carruurta ee 2006;

- lagu xumukey xabsi (haddii dib loo dhigey iyo haddii kaleba) muddo aan 3 bilood ka yareyn ( oo aan ganaax lagu bedelan karin) gudaha 5 tii sano ka horeysey ama intii uu xubin ka noqday guddiga dugsiga maamula;
- lagu xukumey xabsi ah 2½ sano ama in ka badan gudaha 20 kii sano ee ka horeysey inta uusan xubin ka noqon xubin guddiga maamulka dugsiga;
- uu ahaa mid goorta ay aheydba mar uun xabsi lagu xukumey muddo 5 sano ama wax ka badan ah;
- uu ahaa mid la xukumey iyada oo la cuskanayo qeybta 547 ee EA 1996 (qashqashaad iyo rabshad goob dugsi ka dhacda) ama iyada oo la cuskanayo qeybta 85A Xeerka Waxbarashada Dheeraad ama midda Sare ah ee 1992 (qashqashaad iyo rabshad goob dugsi ka dhacda) waqtigii ahaa 5 ta sano ee aheyd ka hora ma inii loo magacaabey ama loo doortay xubin ka ahaanshaha guddiga maamulka dugsi;
- uu dugsiga ka shaqeeyo mudo ka badan 500 oo saac sanad dugsiyeedkiiba haddii uu ku haminayo inuu isku sharxo inuu isla dugsigaas ka noqdo xubin guddiga maamulka ka tirsan;
- yahay xubin la doortey oo ka tirsan Dowlada Hoose ee degaanka (tan waxa ay khuseysaa xubnaha waalid ahaan iyo beel ahaan guddiga maamulka dugsiga ugu tirsanaan lahaa oo keliyah);
- uu diidey codsi uga yimid karaaniga guddiga maamulka dugsiga kaas oo looga dalbayey inuu arji u soo qorto si cuskaneysa qeybta 113B ee Xeerka Booliiska ee 1997 si uu u helo shahaada diiwaanada denbga (criminal records certificate)
- laga mamnuucey qabashada xil xafiis ee xubin ka ahaanshaha guddi dugsigan maalaha yada oo ay u sabab tahay inuu imaan waayey kullamada mudo lix bilood oo xiriir ah.

**(Wixi sharaxaad dheeraad ah ama tallo la xiriirta shuruudaha buuxintooda la iska rabo, fadlan la xiriir Maamulaha dugsigaaga ‘Headteacher”)**

**APPENDIX E**

## FOOMKA MAGACAABIDA LOOGUNA TALLOGALAY DOORASHADA WAALID KA MID NOQDA GUDDIGA MAAMULKA DUGSIGA

< >

**WAXA AY TAHAY IN UU MUSHARAXA BUUXIYO**

**Magac:** ……………………………………..……………………………..………
**(fadlan daabac)**
**Cinwaanka** ………………………………………………………………………

………………………………………………………………………

**Lam.Teleefoonka.** ………………………………………………………………………

**Saxiixa** ………………………………………………………………………

**Bayaanka Qof ahaaneed ee Musharaxa (haddii doonto bog kale ku soo lifaaq)**

**WAXA AY TAHAY IN UU BUUXIYO QOFKA MUSHARAXA SOO MAGACAABAYA**
(kaas oo aan aheyn mid ay isqabaan ama ay wada degan yihiin)

**Magac:**
……………………………………………………..……………………
**(fadlan daabac)**
**Cinwaanka** ………………………………………………………………………

………………………………………………………………………

**Saxiixa** ………………………………………………………………………

**Foomamka waa in la soo celiyaa ugu dambeyn dhamaadka maalinta dugsiga la dhiganayo ee < > ah.**

**APPENDIX F**

**DOORASHADA WAALIDKA GUDDIGA MAAMULKA DUGSIGA KA MID AH**

**QORAALADA WAALIDIINTA LA SIINAYO EE COD-BIXINTA KU SAABSAN**

1. **WARAAQAHA COD-BIXINTA**

(a) Waxa aad u codeyn kartaa <            > musharax (musharaxiin) oo keliyah adiga oo X saaraya sanduuqa (sanduuqyada) ku haboon. Waa in aadan wax kale oo callaamad ah ku dul qorin warqada cod-bixinta. Waalid walba waa inuu foom goonoi ah codkiisa ku dhiibtaa.

(b) Haddii ay warqada cod-bixinta kaa lunto ama wax kaa noqoto, fadlan weydiiso Maamulaha Dugsiga in uu bedelkeed ku siiyo.

2. **SOO CELINTA WARQADA COD-BIXINTA**

(a) Warqadaha cod-bixinta oo la soo buuxiyey (haddii la doono bakhshad lagu soo ridey) waa in la soo celiyaa ugu dambeyn dhamaadka maalinta dugsiga la dhiganayo ee <            > ah. Foomkaaga boostaha ayaad dugsiga ugu soo diri kartaa laakiin waa in uu soo gaara Maamulaha Dugsiga ugu dambeyn taariikhdan.

(b) Marka ay warqada cod-bixinta dugsiga loo soo celiyo, waxaa lagu ridi doonaa sanduuq ama weel sajilan oo maalinta Tirinta ayaa si xafidan loo furayaa.

3. **MAAMULIDDA DOORASHADA**

(a) Maamulaha Dugsiga ayaa ahaan doona Sarkaalka Cod-bixinta dugsiga waxa uuna ka mas'uul ahaan doonaa maamulidda doorashada.

(b) Musharaxa (musharaxiinta) codadkaugu badan helaa guuleysan doonaa.

(c) Diiwaan cod-bixiyeyaal lama heyn doono laakiin Maamulaha Dugsiga baa qaadi doonaa tallaabo kasta oo caqli-gal ah si ay cod-bixinta cadaalad ugu dhacdo.

(d) Cod-bixinta lama burin doono haddii uu qof warqada cod-bixinta heli waayo ama soo celin waayo.

4. **TIRINTA**

(a) Maamulaha Dugsiga ayaa diyaarin doona in wax la tiriyo iyada oo ay jomusharaxiinta ama wakiiladooda joogaan goorta ah <            > waqtigaas oo ay dhinacyada oo idil ku heshiiyeen isagaana ku dhawaaqaya qofka doorashada ku guuleystey.

(b) Maamulaha Dugsiga, oo la tashanaya inta masharaxiinta ah, haddii ay joogaan, ayaa go'aamin doona in la tixgelin karo wixii waraaqo cod-bixin ah ee ay wax si ka yihiin ama xumaadey iyo in kale.

(c) Haddii ay dhacdo in ay labo ama in ka badan oo musharaxiin ah helaan cod siman si hal boos loo buuxiyo, qori tuur ayaa natiijada lagu go'aaminayaa.

(d) Waraaqada cod-bixinta mudo lix bil ah buu dugsiga heyn doonaa.

5. **KU DHAWAAQISTA NATIIJADA**

Maamulaha Dugsiga ayaa waalidiinta oo idil u sheegi doonaa natiijadii doorashada ka soo baxdey isaga oo warka sii marsiinaya wadooyinka uu caadi ahaan dugsiga waalidiinta kula xiriiro – sida iyadoo Warside loo sii marsiiyo.

**APPENDIX G**

**WARQADA COD-BIXINTA EE LAGU DOORANAYO WAALID GUDDIGA MAAMULKA DUGSIGA KA MID AH**

<                                        >

**LIISKA MUSHARAXIINTA**

| | | |
|---|---|---|
| 1. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 2. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 3. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 4. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 5. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 6. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 7. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 8. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 9. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |
| 10. | MAGACA MUSHARAXA | ☐ |

Waxa aad u codeyn kartaa <        > musharax (musharaxiin) oo keliyah adiga oo X saaraya sanduuqa (sanduuqyada) ku haboon. Waa in aadan wax kale oo callaamad ah ku dul qorin warqada cod-bixinta.

Waxaa foomkan ku lifaaqan bayaanada ay **musharaxiinta naftooda keeneen ee iyaga ku saabsan** si ay cod-bixiyeyaasha ugu kaalmeeyaan inay goo'aansadaan midka ay dooranayaan.